



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 5, 2021-ka

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Shuruudaha maaskaraha ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha

Sababo la xiriira kiisaska COVID-19 oo sii kordhaya gobolka oo dhan, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa uga baahan daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay, guryaha daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD iyo goobaha nolosha la taageero in ay xirtaan maaskarayaal marka ay bixinayaan adeeygo. Shaqaalaha iyo dadka ka tirsan shaqada kooxda la taageero iyo kooxda maalintii ee hawlaha taageerada ee ka jira goobo gudaha ah, iyada oo aan la eegayn haddii la joogo goobta daryeel bixiyaha ama haddii kale, waa in ay sidoo kale xirtaan maarkarayaal.

Siyaasadu waxay dhaqan galeysaa Jimcaha, Ogoosto 6, 2021. **Farriinta wax gudbinaysa** ayaa tilmaamaysa shuruudaha.

Kiisaska COVID-19 ee sii kordhaya, oo ay ku jiraan kuwa ka tirsan nidaamka adeega I/DD, waxay ka dhigan tahay in ay tahay in aanu sameyno dadaalo lagu ilaalinayo caafimaadka iyo badbaadada dadka ka tirsan adeegyada. Shaqaalaha ka shaqeeya goobaha kor ku xusan waa in ay xirtaan maaskare ama waxyaabaha wajiga la gashado oo ku habboon mar kasta oo adeeygo la siinayo dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Tallaalada COVID-19 waxay muhiim u yihiin ilaalinta dadka qaba I/DD, qoysaskooda iyo shaqaalaha taageerada. Haddii aadan hore u sameynin, fadlan is tallaal. [Website-ka](#) Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa leh qalab lagu helo goobaha tallaalka ee kuu dhow.

Waan kaaga mahad celinaynaa dadaalkaaga la xiriira caafimaadka iyo badbaadada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.